

Foomka Ogolaanshaha Codsiyada Habeen Dhaxa ee Caawimada Degdeg ah (EA) Meelaynta Hudheelka

Tilmaamaha

Qoyska dhan ee EA waxay qaadan karaan afar habeen (Dhixitaano) iyagoo ka maqan hudheelka bil kasta, **laakiin waxaad u baahantahay in aad ogolaansho waydiisato Waaxda Guryaynta & Horumarka Bulshadda (DHCD) ugu horayn.** Haddii aanad joogin hudheelka labba ama in ka badan oo habeen oo isku xigta, ogolaansho la'aan ama sabab wanaagsan la'aan, waxaa lagaa joojin karaa barnaamijka.

Qofka xubin qoyska aka ah waxa uu sidoo kale ka qaadan karaa hudheelka dhixitaan habbeen si ka gaar ah inta kale ee qoyska. **Sidoo kale waxaad waydiisan kartaa ogolaansho in qoyskaagu uu ka maqnaado hudheelka habeenkaa doonto.** Ogolaanshaha waa loo diidi karaa xubin qoyska ah in uu maqnaado in ka badan labba habeen oo isku xigta, iyaddoo ay jirto sabab wanaagsan oo ah maqnaansho ka dheer.

Si aad ogolaanshu u waydiisato, buuxi foomkan oo fagas ugu dir qofka uu magacaabay Agaasimaha Isuduwaha DHCD (magaca iyo lambarka fagaska waxaa ku siinaya hudheelka) ugu yaraan 2 maalmood oo shaqo ka hor inta aanu qof qoyskaaga ahi habeen kii ka dhixin hudheelka.

Haddii aad codsato habeen dhax ka yar 2 maalmood oo shaqo inta aanad qorshayn bixitaan, waxaad u baahanyahay in aad u sharaxdo sababta aanad codsigaaga wakhti buure ah u samayn. Haddii aad qaadata habeen dhixitaan ka dib markaad gudbiso codsi daahay oo aanad ogolaansho haysan ka intaanad tegin, DHCD waxay diidi kartaa codsigaaga ka dib markaad tagtay oo waxay helaysaa in habeen dhixidu ay ahayd xad gudub sharciyada ah. Tani waxay keeni kartaa soo joojinta dheefahaaga xarunta hoyga.

Haddii qoyskaaga oo dhammi uu u baahdo in ay hudheelka ka maqnaadaan in ka badan 4 maalmood oo isku xigta, waxaad u baahan doontaa in aad codsato Soo dhex gal Degdeg ah oo ku Meel gaadh ah oo Xarunta hoyga ah (TESI). La xidhiidh Isuduwahaaga Hoy la'aanta si aad u codsato TESI.

Foomka Codsiga dhixitaanka habeenka

Magaca qofka codsanaya: _____

Kani waa codsiga ka maqnaanshaha _____ Hudheelka, Qolka _____ ee habeenada soo socda:

(qor dhammaan taariikhaha): _____

Codsigan waxaa loogu talo galay [sax hal]: _____ dhammaan qoyska _____ qayb ka mid ah qoyska.

Haddii aad saxday qaybta qoyska, qor cidda qoyskaaga ka mid ah ee maqnaan doonta: _____

Sababta(ha) habeen dhaxitaanka la codsaday ee qofka xubinta ka ah qoyska:

Haddii codsigan lagu soo gudbiyo in ka badan 2 maalmood ka hor habeen dhaxa la codsaday, sharax sababta:

Saxiixa Qofka Codsanaya: _____ Taariikh: _____

Telefoonka moobilka lagaala soo xidhiidhi karo, haddii ay wax jiraan: _____

Fagis ugu dir foomkan qofka uu magacaabay Agaasimaha Isku xidhku ee lambarka hudheelku ku siiyay. Hudheelka waxa uu ku siin doonaa adiga telefoon aad wacdo si loo xaqiijiyo in aad heshay. Hudheelku waxa uu kuu soo diri doonaa fagas adiga lacag la'aan ah. DHCD waxay ku ogaysiin doontaa haddii codsigaagii la aqbalay. Haddii aad war ka maqli waydo DHCD 2 maalmood oo shaqo gudaheed, waxaad u qaadan kartaa in la aqbalay codsigaaga.

In uu buuxiyo Agaasimaha Isku Xidhka ama qof loo magacaabay

La ogolaaday Lagu ogolaaday iyaddoo leh isbeddelada soo socda: Aan la ogolaan

Ku dar sababta diidmada:

Saxiixa Shaqaalaha DHCD: _____ Taariikh: _____

Daabac magaca iyo lambarka telefoonka shaqaalaha DHCD saxiixaya: _____